

## Qaabka loo buuxinaayo foomka lagu dalbado sawirada iskuulka

Iskuullada dalkan Finland waxaa sannad walba laga qabanqaabiyaa sawirrada ay ardeydu ku galaan iskuulka. Sawirradaas waxaa ardeyda qofkii doonaaya laga qaadaa, sawir qaarka sare ah iyo sawir kooxeed laga qaadaayo fasalka oo dhan.

Dhammaan ardeyda ka qayb gashay sawirradaas la qaaday, waa in ay foomkaan dib u soo celiyaan, iyadoo la soo buuxiyay. Waxaa waalidka laga doonayaa in ay soo saxiixaan foomkaan. Haddii ardeyga ay da'diisu tahay 18 sano iyo wixii ka weyn, isaga ayaa foomka soo buuxinaaya, soona saxiixaya. Foomka waxaa loo dhiibayaa sawir qaadaha.

Marka sawirrada la qaado kaddib dalabkaaga waxa kuugu jira ayaad wax kaga baddali kartaa tukaanka internetka: halkaas waxaa ku jira alaab ad kala doordooran karto oo aad u badan. Sawirrada diyaarka ah waxa kale oo macquul ah in toos loogu diro guriga ardayga si loo arko. Sidoo kale haddii aadan dooneyn in adiga wax sawir ah lagu soo diro, waxaad haddii ad u baahato goobta dalabka ka saari kartaa dhammaan noocyada kala duwan ee sawirrada. Waxaad naga heleysaa iimeyl ogeysiin ah, kaasoo laguugu sheegaayo marka dalabka la soo geliyo internetka, si aad u kala doorato hadba nooca aad adigu dooneyso. Marka aad farriintaas naga hesho kadib, waxaad caadiyen heysataa muddo todobaad ah, oo aad ku kala dooran karto hadba nooca sawirka aad dooneyso

## Sidaan soo socota ayaad u buuxineysaa foomka dalabka

God walbaa waxaad ku qortaa hal xaraf, lambar ama waxii kale oo calaamad ah, si ay u fududaato akhriska qoraalkaas. Foomka waa in lagu buuxiyaa far waawayn oo sida tusaalaha goobaabinta ku jira ah (A B C D E F G H I J K L M N O P Q R S T U V W X Y Z Å Ä Ö).

### 1. Qofka la sawirayo

- Magaca hore iyo kan qoyska ee ardeyga ka qeybqaadanaaya sawirka
- Lambarka fasalka ee ardeyga ka qeybqaadanaaya sawirka (tusaale ahaan 1A, 5B, 9C)

### 2. Warbixinta qofka dalabka sameynaaya

Qofka dalabka sameynaaya wuxuu noqon karaa ardeyga isagu ka weyn da'da 18ka sano ee qaangaarka ah ama qofka ka mas'uulka ah ardeyga da'diisu ka hooseeyso 18 sano.

- Magaca hore iyo kan qoyska ee qofka dalabka sameynaaya
- Cinwaanka qofka dalabka sameynaaya: magaca wadada, lambarkeeda, lambarka daarta uu degan yahay (tusaale ahaan Martinkyläntie 41)
- Lambarka boostada iyo goobta: degmada ama gobolka, aad ku nooshahay (tusaale ahaan 01720 Vantaa)
- Lambarka telefoonka qofka dalabka sameynaaya (waxaa aad u fiicnaan laheyd in uu yahay telefoonka gacanta, tusaale ahaan 040 123 4567)
- Iimeylka qofka dalabka sameynaaya. Tan waa warbixin muhiim ah, waayo warbixinaha la xiriira dalabka sawirada waxaa lagu soo dirayaa iimeylka. Iimeylkaas waa aqoonsigii aad ku geli lahayd adeegga internetka.
- Saxiixa.

### 3. Macluumaadka

Halkan waxaa laguugu bandhigayaa alaabta qiimahooda la jabiyay ee ad ka dalban karto tukaankayaga internetka. Alaabta waxaad lacagtooda bixin kartaa marka ad ka dalbanayso tukaanka internetka ah adiga oo bankigaaga internetka ka bixinaya ama biil u dalbanaya kuu soo dhacaya marka ad alaabta hesho. Dhammaan alaabta qofku wuxuu u haystaa 14 maalmood oo uu ku celin karo (kuma jiraan sawirrada dhijitalka ah).

### 4. Sawir saaxiibeedka


Sawirrada qaarka sare ah ama kan koox ahaanta lagu galo, waxaa kaloo sii dheer in maalin kaas sawirrada la qaadaayo aad la geli karto saaxiibka ama walaalaha. Foomka waxaa lagu buuxin karaa saddex sawir oo kala duwan oo asxaab lala gali karo. Waxaad sidoo kale ku buuxin kartaa oo kaliya, warbixinta hal ama laba sawir oo kuwa saaxiibka ah. Sawiradda asxaabta mid ka mid ah waxaa wada gali kara 4-6 qof iyadoo ay ku xidhantahay marada sawirka lagu horgalayo inta ay leegtahay. Haddii aadan dooneynin sawirka saaxiibka, qeybtan loogu tala galay waxba ha ku qorin.

- a) Halkan ku qor sawirka asxaabta dadka ka qaybqaadanaya magacyadooda iyo tirada fasalladooda haddii walaalaha ama asxaabta wada galayaa ay kala fasallo yihiin. Magaca hore ayaa ku filan.
- b) Mar kale qor magaca ardeyga la sawiraayo. Magaca waa in mar labaad la qoraa, waayo sawir qaaduhu wuxuu fujisanayaa qeybta hoose ee foomka

### 5. Midabka marada sawirka lagu horgalayo

Halkan waxaad ka dooran kartaa sawirka marada loo isticmaalayo in lagu horgalo midabkeeda, haddii sawirka la qaadayo ay suuro gal tahay in loo helo. Waxaan anagu isticmaalnaa maro buluug ah haddii macmiilku uu nooc kale dalban waayo. Midabada kale ee la dalban karo waa:

- a) maro midabkeedu sibiidhi yahay ama
- b) maro midabkeedu binni yahay.



## Koulukuvien tilauslomake

Kuvaajamme saapuu

Kaikkien koulukuvaukseen osallistuvien on täytettävä tämä lomake ja palautettava se kuvaajalle viimeistään kuvauspäivänä. Täytä lomake tikkurijain ja allekirjoitus! Ohjeita lomakkeen täyttöön eri kielillä: [www.frendikuva.com/info](http://www.frendikuva.com/info)

### Kuvattavan tieto 1.

**1a** Etunimi

**1b** Luokka/ryhmä

Sukunimi

### Tilaaajan (18 v. täyttänyt) tieto 2.

**2a** Etunimi

**2b** Lähiosoite

**2c** Postinumero ja -toimipaikka

**2e** Sähköposti\* (huoltaja tai 18 v. täyttänyt oppilas)

Sukunimi

Matkapuhelin\*

**2d**

**2f**

\* Saat viestin nettikaupan digitaalisista kuvavedoksista ilmoittamaasi puhelinnumeroon ja sähköpostiosoitteeseen n. viikon kuluttua kuvauksesta.

Allekirjoitus (huoltaja tai 18 v. täyttänyt oppilas)


Hyväksyn kuvausehdot, tilaus- ja toimitusehdot sekä henkilötietojeni käsittelyn Frendikuva Oy:n tietosuojaselosteen mukaisesti. Ehdot ja tietosuojaseloste luettavissa [www.frendikuva.com](http://www.frendikuva.com)


### Info

# 3.

Löydä suosikkisi

nettikaupan valikoimasta:  
[www.frendikuva.com](http://www.frendikuva.com)





# 5.

### Taustakangas

Käytämme muotokuvissa oletuksena sinistä taustakangasta. Voit valita sen sijaan:

harmaan taustan tai

ruskean taustan.

### Kaveri-/sisarus 4.

Täytä alle kaveri-/sisaruskuviin osallistujien **etunimet** (lisää myös luokka/ryhmä, jos se on eri kuin kuvatulla).

**Kokoonpano 1.**  
Kavereiden/sisarusten **etunimet**  
(luokka/ryhmä)

**4a**

**Kokoonpano 2.**  
Kavereiden/sisarusten **etunimet**  
(luokka/ryhmä)

**4a**

**Kokoonpano 3.**  
Kavereiden/sisarusten **etunimet**  
(luokka/ryhmä)

**4a**

**!** Yhteen kaverikuvaan mahtuu enintään kuusi (6) henkilöä.

Oma nimi **4b**

K1



[www.frendikuva.com](http://www.frendikuva.com)  
toimisto@frendikuva.com